@SOMALIBOOKS

WADNIHIII BADWEYNTA



@SOMALIBOOKS

Qoraa: Feysal Mohamed Abdurahman

@SOMALIBOOKS

WADNIHII BAD WEYNTA

Tani waa qiso dhab ah oo ka dhacday dhul kamid ah dhulalka ay Soomalidu degaan gaar ahaan gobolka Barri qasatan magaalda Boosaaso qarnigii 21 aad.

xaaji Raage waa mid ka mid ah gacansatada ugu cansan magaalada Boosaaso,xaaji Raage waxa uu ahaa dadka qiimeeya lacagta aanan qiimeyn qofka dadnimadiisa iyo karaamadiisa mana qadarin jirin dadka nolasha hoos ama mida dhaxaadka ah waayo waa uu iskala weynaa

xaajiga mar walbo waxa uu dhih jiray "Marna lagama yaabo in gurigeega loo soo guuriyo gabar faqiir ah ama wiil faqiir ah ingabadheyda guurasado".

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

xaaji waxaa uu dhalay labo wiil iyo gabar, waxa uu saa'id u jeclaa gabadhiisa lagu magacaabo Qamar.

Qamar waa gabadha ugu yar rerka xaaji Raage taasna waxa ay keentay in loo xanaaneyo si ka duwan ilmaha kale loona sameyo wax walbo ay dalbato, waa 14 sano jir waxa ay dhigataa mid ka mid ah iskuulada ku yaal magaalada Bosaaso kaas oo ay dhigtaan dadka lacagta leh ciyalkooda oo kaliya iyo cid walbo oo awoodo in ay iska bixin karaan lacagaha iskuulka.

Qamar waxa ay dhigataa fasalka 6 aad ee dugsiga dhaxe.

Qamar ma ahan mid ku qanacsan nolasheeda waayo xaafada gaari ayaa loga keenaa laguna soo celiyaa inta ay guriga joogtana looma ogola in ay dibadda u baxda ama la ciyaarto gabdhaha ay isku da'da yihiin inta ay iskuulka joogtana waxaa la socdo walaalked ka weyn

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

kaas oo shegayo haddii ay qof la hadasho ama la ciyaarto u gudbinaayo Aabbe.

In muddo ah markee aheyd gabar aan la hadleyn wax wiil ah, wiilashiina ay ogyihiin in Aabbeheed uu yahay mid xanaaq badan ka dib markii uu malin wiil ku garacay irida iskuulka kaas oo rabay in uu weydiiyo wax ku sabsan maadooyinka maadaamo imtixaankii mar dhaw loo fariisan rabo wayo iyadu waxa ay aheyd gabar ku fiican waxbarashada balse aan ku qanacsaneyn sida uu Aabbeheed u la dhaqmo.

Dhamaadkii sanad dugsiyeed fasalka 6aad Qamar ayaa gashay kalinta kowaad dhamaan ardaydii imtaxnka sidoo kale waxa ay noqotay ardayada ugu aqlaaqda wanagsan dhaman ardayda dhigato iskuulka.

Halka uu walaalkeed ku dhacay imtixaanka fasalkiisa 8 aad.

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

Arrintii ayey Hooyadeed u shegtay waayo waxa ay aheyd saaxiibteeda marna hooyadeed.

Qamar hooyadeed ayaa u sheegta xaaji Raage.

xaaji Raage aad ayuu ugu farxay waxa uu hadiyad ahaan ugu keenay dhar iyo talefoon qaali ah, halka uu walaalkeed ka bixiyay iskuulka oo uu geeyay kuleej ku yaal magaalada.

Bilowgii sanad dugsiyeedka cusub Qamar waxa ay aheed mid ka badalann sidii hore madama uu Aabbaheed cadaadiskii ka yareeyay oo xoogaa xuriyad la siiyay.

Maalin maalmaha maha ka mid ah ayaa gaarigii iskuulka geyn jiray lug ka fariisatay darawalkiina u sheegay in ay waqti qaadaneyso in la sameeyo balse iyada oo gaariga agtaagan oo ay ku wareersantahay xaalada waxaa soo maray wiil ay isku iskuul yihiin oo iyada garanayo markaas ayuu ku yiri "waan u jeedaa in uu gaariga kaa halaabay aanan lugeys aqoon

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

balse maanta wey ku qabatee horay makuu sii wadaa anaa iskuulka u sii socdee”.

Qamar inta ay qososhay ayee ku tiri “ Waa sax san tahay ma garanayo lugeys balse ina mari hada adi ayaa I baresidee lugeyska”.

Intii ay daawada sii socdeen ayey waxa ay is dhaafsadeen sheekadaan

Wiilkii ayaa waxa uu ku yiri “ Geenyadii ina xaaji waligaa meshaan gari ayaa ku mari jirtay ana lug ayaa ku mari jiray balse maanta lug ayaa ku maree maanta”

Qamar “ Sax laakin maalin uun waan jeclaa in aan lug ku maro balse maanta waa dhacday malaha nasiibka ayaa dhulka I keenay”

Wiilkii “ Nasiib aa waa maxay nasiibkaas maanta dhulka ku kenay? “.

Qamar “ ma garanayo balse amaa adi tahee nasibkaas”

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

Wiilkii " Waa suurta gal waayo anba walikee xili hore ayaa soo bixi jiray balse maanta waan soo dahay malaha nasiibka ayaa sax ah"

Qamar " Ilaa hada ima sheegin magacaaga iyo fasalka aa dhigato"

Wiilkii " Magaceygu waa xamza, dhigata fasalka todobaad B adna A ayaa tahaa filaa"

Qamar " Haa, runtii waxaa tahay wiil kaftan badan oo aqlaaq leh waana ku mahadsantahay sida aa ii caawisay maanta."

xamza "Adna sidoo kale waxaa tahay gabar cajib, balse waxa laga aminsanyaha aanan aheyn."

Qamar " Maxaa leyga aaminsanyahy iskuulka adna maxaa iga aminsaneed?."

xamza " Ani ahaan inaa tahay qof isla weyn ardayda iyo dhaman dhalinta xaafada, balse fikir keygu waxa uu ahaa mid qaldan kana rali noqo".

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

Qamar (soomaalidu waxa ay ku maah maahdaa barasho horteeda ha I nicn) " Dhib malahan waayo waxaan ahay qof inta badan aan hadal badneyn taas ayaa keentay in ay dadka siyaabo kala duwan u fasirtaan, balse adi xafadeena maa dagantahay?".

xamza " Haa, hada waxaa lo soo garay iskuulka ka waran hadaa saaxiibo noqono"

Hibaaq " Waad u qalantaa balse saaxibtee ayaa la soo tashanaa"

xamza " Waa tuma saxibtaa?".

Hibaaq " Waa hooyadee, wayo marna waa saaxibadey marna walaashey waayo waxa ugu wanaagsan waa in aad waalidkaa aad saaxiib ka dhigato , marka maalin kale iyo nasiib kale anaa jawaab ku soo siinaa."

xamza " Adi gaari ayaa ku imaadaa ana waa soo lugeeyaa marka intee jawaabta ka helaa maanta fursad kugu helee."

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

Qamar " Bari meesha aa maanta iska soo raacnay ayaa farmashiiyaha ku yaal ayaa jawaab kugu reebaa in sha Allah".

xamza " Jawab warqad ahaa mise si kale".

Qamar " Ninka farmashiga ayaa fariin kugu reebaa oo waxaa u sheegaa magacaaga, balse jawaabta hadee haa tahay waxaa kugu dhibaa bugeyga xasuus qorta balse hadee maya tahy waxaa kugu dhibaa warqad rali galin, lkn adi yaa kala soo tashanee saxibtinimadeeda?".

xamza "Ani waxaa kala soo tashanaa nasibkii maanta I soo daahiyay oo ina kulan siiyay, balse waxaa tahay gabadh cajiib".

Qamar " Hagaag nasiib wacan."

Intaas ka dib qof walbo xiisadiisa ayuu galay,

Basle arinta layaabka ayaa aheyd markii ay Qamar iskuulka ku imaaday gaari la'aan markii ugu horeysay.

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

Markii ay Qamar ku laabatay xafadeeda ayaa ay arintii dhex martay xamza u sheegtay Hooyadeed.

Qamar Hooyadeed ayaa markii ay dhageysatay wixii dhex meray gabadheeda iyo wiilka cusub ayaa waxa ay weydiisay gabadheeda side u aragtaa adi ahaan?.

Qamar " Ani ahaan ilama xumo balse adi ayaa iga wayo aragsan oo wax walbo iga og waxaa rajeynaa in aan go'ankaada raaci doono".

Qamar Hooyaded ayaa u sheegtay in la saaxiibto wiilkaas, una noqon doono mid wax ka badala nolasheeda.

Qamar markii ay dhageysataay go'ankeeda hooyadeed ayaa waxa ay go'ansatay in ay fuliso balantii ay qaaday.

Subaxii xige ayaa Qamar soo aaday iskuulka balse markee gaariga soo raacday lana soo

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

gaaray halkii ay aheyd balanta ayey darawalka waxa ay ka codsatay inuu halkaan u joojiyo.

Darawalkii ayaa ku dhahay xanuun miyaa dareemee. Qamar waxaa ku geynaa isbitaal fiican?.

Qamar ayaa ku tiri wan ficanahay balse waxaa rabaa in aa ka soo gato kaniinika vitamin c oo aan iska dhuudhuuqo.

Darawalkii ayaa u joojiyay halkii ay rabtay.

Qamar ayaa inta ay gaariga ka soo dagtay ayey farintii u shegtay niikii farmashiga joogay iyada oo u dhiibtay buugeda xasuus qorka ah.

Hamza oo ah mid ka wal walsan in ay aqbali doonto saxibtinimadiis iyo in kale ayaa ima aday farmashigii waxa uuna u shegay magaciisa iyo gabadha magaceeda.

Intaas ka dib ninkii jogay farmashiga ayaa siiyay buug xasuus qor ah.

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

xamza markuu arkay buuga ayuu farxay oo uu ku dhahay mahadsanid saaxiib.

Intaas ka dib xamza ayaa bilaabay in uu raadiyo Qamar xiligii bareega.

Waxa ay mudo wada socdeen oo ay waqti ku wada qadan jireen bareega.

Waxa ay sanad dugsiyeedka fasalka todobaad ku dhameysatay mid ka duwan midkii sanadyadii hore.

Intaas ka dib Qamar iyo xamza waxa ay ahaayeen kuwo isku soo dhawaanayo midba midka kale.

Dhamadkii fasalka 8 aad oo lagu guda jiray xafladii qalan jabinta ee dugsiga dhexe ayaa Qamar u soo bandhigtay in ay saxibtinimadooda u badalaan xiriir jaceyl.

xamza aad ayuu ugu farxay arintaas wuuna ka aqbalay.

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

Qamar iyo xamza waxa ay noqdeen lamanayaal ay ku daydaan inta kale oo daneenayo in ay xiriir sameeyaan.

Inta badan waqtigooda bareega ayee ka faaideysan jiraan oo ay wada sheykeysan jireen iskuna soo qori jireen dhambaalo jaceyl oo midba midka kale ka dareenkiisa ku cabirayo.

xamza ayaa waxa uu u soo qoray warqad geraar ah oo u qorneet sidaan

Xogta hadlka iyo xiisaha murtida xididga suuganta.

Naxwahaan ka soo xulay adaa kugu xakaayaday.

Waana gaari xeylkeeda inaa kugu xariirayee

Xilkas nimo Allaa kuu dhalshee iyo garasho xeel dheer.

Sida xuural ceyn janada lala xayaadayee

Xafiday xasilyay naftaa xiiso galisayee.

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

Kaftan iyo weedh aan xaajin laheyn ku

xaganeyso oo ruux xalaal ha baad ku

xaragootayee.

Qalbi xaran baad ledahiyo laab xaruuriyahee.

Xubno genyalee naftaa xiiso galisaayee..

Sidii Xaawo iyo Aadan baan nisku kee xulayee.

Xarafyada qurankiyo ducaa kugu xijaabaayee.

Qamar ayaa iyadana ugu soo jawaabtay warqad kaloo dhambaal.

Qoraxdoo arootii qar la soo baxdaoo aan

caadku qarinbaad qumanow qabadeedii ledee.

Nabi yusuf quruxdii

Qaadirkeennu siiyaa adna qeyb ka wadataayoo

Qeyrkaagu ku dhaaftee.

Hadaan qadoo anfaaciga

Adaan kugu qaboobaa.

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

Markaad qun u dhaqaaqdee

Talaabada aad qadee

Deymadada il qabdka leh

I qooransigedey

Qososhaa nafteyduyee.

Lamaanaha da'doodu yartahay hadana Isfahansan xitaa waxaa la cajabay qaar ka mid mamulka, macalimiinta, gabadha maqayada wax ku iibiso oo mar walbo agteeda wada joogi jireen iyo ardayda iskuulka dhigato.

Qamar iyo xamza xiriirkoodu waxa uu garay meel sare mar walbna waxa ay ahaayeen kuwo iska caawiyo duruusta iskuulka maadaama ay gudbeyn herka dugsiga sare rajenaayeen in ay wada dhameystaan iyaga oo wada jir ah.

Malin malmaha ka mid ah ayaa Qamar waxa ay weysay lamanaheeda oo ay ka weysay halkii ay mar walbo waqti ku wada qadan jireen xiliga bareeka ah, inta ay geysaha aygtay oo ay

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

miriqdiisa weysay ayaa ay weydiisay gabadhii maqayada shideysay .

Gabadhii ayaa ugu jawabay ma aanan arkin saake balse waxaa u maleynaa in uu cajisanyahay maanta.

Qamar inta ay xoogaa mesha fadhisay ayey ku laabatay fasalkeda iyda oo wajigeeda aanan farxad ka muuqan.

Maalintii xigtay hadana Qamar meysan arkin lamanaheeda inta ay yaabtay ayaa ay warqad dhambaal ah ugu dhiibtey gabadhii maqaayada joogtay oo ay ku tiri igu siigey galabta markaa sii baxeysid jawaabna iiga keen bari.

Dhamabaalka ayaa u qornaa sidaan.

Hobey xalayaa hob see iriyoo

Hawaawiyoo hurdo la iga didiyee

Hamzaa la hadlaa oo i hor yimidoo

Hawada la adoo oo isla hadlaa

Habeyn iyo dharaar ma harsadoo

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

Halkaa mareesiyo ayaa heybiyaa

Habaabayee halkee kaa dayaa oo kaa helaa

Qalbi iyo indho kuu omanaa ayaa hayaa oo ku sugaaye ku away.

xamza markey gartay farintii ayuu maalintii xigta iskuulka imaaday una shegay in uu xanuunsanaa sidasna uu u maqnaa.

Waxa uuna usii soo qoray dhambaal oo ku sifeynayo quruxdeeda.

Dayax qanimadiisii aan caadku qariniyo

Cirku sagalku qeydmiyo

Qureyshtii hawenkaay

Qadow geed ku yaaliyo

Qowdhihii Qamaree

Qortaada dheeree

Lagu qorey cabbaadhyaha

Markaad xageyga usoo qaloocisaa bey

Ma liq daa I qabataaa.

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

Waxa ay hasaawahooda garay meshii ugu sareysay dhameysteen iskuulkii oo ay qorshenaayeen in ay aqal galaan intee bilaabin jaamcadooda.

Waxa ayna mar iskuulka ka dib ku sii wada xariiri jireen talefoonadooda ay waqti kuwada qadan jireeyn.

Wax walbo oo wanagsan dhaman dadka oo dham ma farax galinayaa farxada ay heshay Qamar intii ay taqaanay lamanaheeda ayaa waxaa meel ka soo baxay xaji Raage oo gabadhiisa u sheegay in uu siin rabo wiil uu dhalay nin ay shirko yihiin oo sidiisa oo kale ah oo lacaga heysto.

Arintii ayaa Qamar layaab ku noqotay waxa ayna la tashatay hooyadeed.

Hooyadii ayaa ku dhahday is daji anaa la hadlaa Aabbahaa oo fahansiinaa arintaada marka is daji hana sameyn wax qalad ah.

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

Hooyadii ayaa xajigeeda u la timid arintii gabadheeda una sheegtay in wiil kale oo xafada la degan oo ay iskuulka isla dhameeyeen sanadyo badan ay saaxiibo ahaayeen ay jaceshahay.

xaji Raage markuu arinta maqlay ayuu afka furtay oo go'ansaday in uu aqbali doonin arintaas una sheegay in ay maalinta qamista ah isku diyaariso maherka ka dibna ay a adi doonto jamacad dibada ah.

Talo fara waa ka baxdey Qamar hooyadeed iyado oo niya jabsan ayee u soo labatay una shegtay go'anka Aabbeheed.

Qamar inta ay yaabtay oo ay garan weysay waxa ay sameyso ayee durbo wacday lamanaheeda una shegtay xalada mesha ay mareyso Aabbeheedana uu yahay mid go'aan leh.

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

xamza ayaa soo jeediyey in ay isla baxsadaan oo ay magaalada dhinac kale ka dagaan.

Qamar ayaa ku racday go'ankiisa hadeyba jaceylkooda sidaas ku badbaadayo.

Subaxii xigo Qamar ayaa soo wacdey hooyadeed oo ma qan iyo Aabbeheed gabadha shaqaalada waxa ay ku tiri hadii la ikaa weydiiyo waxaa dhahdaa wey hurdeysaa yaaa lii kicin ayee dhahday maanta.

Qamar iyo xamza wey isla soo baxeyn waxay afka aadiyeen magaalada dhinaceeda waqooyi oo ay xamza walashii dagantahay.

Waxa ay mudo saacado ah maqnaato gurigii waxaa yimid Hooyadeed iyo Aabbeheed,balse xaji Raage sida uu u soo socday isaga iyo wiilkiisa weynka ayaa waxey soo aadeen qolka ay dagneyd Qamar balse waa uu xernaa balse xaajiga waxa uu heystaa dhamaan qoloka

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

furayaashooda haduu furayba maba joogto gabadhiisa.

xaaji ayaa u wacay gabadhii adeegtada aheyd oo weydiiyay halkii ay Qamar aday.

Gabadhii miskiinta aheyd maba ogo in odayga ka soo wayay qolka ayee waxey iska tiri wey jiiftaa.

Inta uu ku qeyliyay ayuu dharbaaxo ugu daray ayuu dhahay anaa ka soo wayay ay sheeg intee aaday,

Gabadhii adegtada ayaa ku tiri bananka ayee aday.

xaaji waxa uu sacaado sugo maba soo socto gabadhii.

Isaga oo yaaban ayaa waxaa soo wacay ninkii uu wilkiisa siin la haa gabadhiisa oo ku dhahaayo gabadhhada iyo wiil ayaa isla sii socday inta uu xanaaqay ayuu cidan watay ayaa

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

gabadhiisa ka daba tagay wiikiina xabsiga dhigay.

Qamar waxaa lagu soo celiyay gurigeeda saxibkeedna xabsi ayaa loo taxaabay xaalkuna waa mid cariiri ku ah arintana faraha wey ka sii baxday, intaas waxaa u dheer in loo diiday in ay qolka ka soobaxdo.

xamza markuu mudo saacado xabsiga ku jiray waxaa soo doonay waalidkiisa loona shegay in ay wiilkooda ka ceshtaan gabadhaas.

xamza ayaa guriga ku soo laabtay isaga oo ka wal walsan waxa qabsaday lamantiisa ayee markiiba talefoonka ka wacay xoogaa markee islahadlaayeen ayey telka ku damisay wuu yaabay nasiib wanag wey ku soo celisay una sheegtay in ay telefoonka qarsooni ku isticmaaleyso.

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

Qamar inta ay yaabtay ayee waxey la tashatay hooyadeed oo ay ku tiri "Hooyo I caawi si aan u helo jaceylkeyga".

Hooyadeed ayaa ku tiri " Aabbahaa si kasta ayaa ula hadlay mana ahan mid wax fahmaayo ee waxaa semeysiin isla baxsada magaaladaan dhamanteed oo badda isla gala oo tahriib ku ada dalka Yemen lacagtana aanaa ku sii nayo oo doonta ku raaceysiin".

Qamar waxa ay arintii u shegtay lamaanaheeda waxeyna ushegtay in uu soo fiiriyo doon bixeyso malmaha soo socdo.

xamza waa uu soo baxay waxa uu imaaday halkii ay ka baxaan doomaha dadka tahriibiya waxa uuna helay doon baxeyso bari 6:00 pm oo maqribnimo.

Habeenkii ayuu waxa uu arintii u shegay Qamar sidii ayee ku balameen in ay soo baxdo 4:00 pm

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

oo galab nimo soona xerayo dhar waa weyn iyo indho shareer si loo aqoonsan wajigeeda.
Qamar arintii ayey u shegtay hooyadeed,
Hooyadii ayaa ku tiri waxaa semeysaa
Aabbahaa utaga oo waxaa tiraahdaa wan ogalahay guriga ka dibna u sheeg in aa rabtdi in aad suuqa dhar ka soo gadaneysi oo arooskaaga ah adi iyo gabadha adegtada oo ah,
xaji Raage markuu arintii maqlay ayuu fasaxay.
Qamar sidii ayee ugu soo baxday gurigii waxeyn saxibkeed ku kulmeyn iskuulkii ay dhameeyeen bishii hore kadibna waxa ay adeen halkii ay doomaha ka baxayeen.
Qamar iyo xamza ayaa doontii koray sacadu markey aheyd 6:20 pm iftiinkii uu sii mirqaayo mugdigana soo galaayo ayee ka dhaqaaqen magaaladii ay ku barbaareyn waxna ku barteen.

La soco qeybta xigta malmaha soo socdo

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

.

@SOMALIBOOKS